



Barack and Michelle Barnaamijka Obama Middle School Program

Degmada Saint Paul Public Schools waxaa ka go'an inay bixiso qaab waxbarasho oo dugsiga dhexe ah oo ku guuleysta in uu taageero ardayda inta ay ku jiraan marxaladda muhiimka ah ee kala guurka noloshooda. Waxaynu aaminsannahay in dhammaan ardaydu ay u qalmaan waxbarasho dugsiga dhexe taas oo ah mid korriinkooda ku habboon, maskaxdooda ka shaqeysiiso, awood-siiso ardayda oo loona siman yahay.

Waxyaalaha ay iskaga mid yihiin waxbarashada Montessori Model iyo midda Middle School Model

Isagoo la mid ah qaabka waxbarasho ee Montessori, qaabka waxbarasho ee dugsiga dhexe waxaa udub-dhexaad u ah koox macallimiin ah iyo la-taliye kuwaas oo ka wada shaqeeya si ay u daboolaan baahiyaha xag shucuur, xag bulsho, iyo xag tacliin ee ardayda.

Qaabka Waxbarasho ee SPPS Montessori Model	Qaabka Waxbarasho ee SPPS Middle School Model
Diiradda wuxuu saaraa waxbaridda dhan walba ee ubadka.	Wuxuu bixiyaa duruus ay ardayda fasallada 6-8 udubdhexaad u yihiin. Macallimiinta afar maaddo oo xuddun u ah maaddooyinka (xisaab, saynis, akhris/qoraal iyo taariikh iyo juquraafi) ayaa wax baro koox arday oo isku mid ah maalinta dugsiga oo dhan.
Ardaydu waxay wax ku bartaan tallaabo iyaga u shaqeyso.	Macallimiintu waxay iska kaashadaan koox ahaan si ay u daboolaan baahiyaha xag shucuur, xag bulsho, iyo xag waxbarasho ee koox arday ah.
Wuxuu qaabkan horumariyaa xirfadaha bulshada iyo shucuurta.	Macallimiinta, la-taliyayaasha, shaqaalaha bulshada iyo shaqaalaha taageero waxbarashada ayaa si wadajir ah uga wada shaqeeya si ay ardayda u siiyaan duruus ka caawiya inay maareeyaan isku dhaca asaagooda, kasbashada saaxiibtinimada, ka hortagga handadaadda, maareynta walbahaarka iyo welwelka.
Wuxuu qaabkan ardayda ka fishaa natiijo fiican oo xagga tacliinta ah.	Waxbarashada waxaa ka mid ah koorsooyin aasaasi ah oo adag iyo kuwo dookh ahaan loo qaato, iyo barnaamijyada u diyaargarowga kulliyadda iyo shaqada.
Wuxuu qaabkan ku faanaa kala duwanaanta ardayda.	Arday walba waxa lagu taageeraa qofka uu yahay iyo cidda uu rajeynayo in uu noqdo iyadoo la ixtiraamo lana xuso dhaqankiisa, isirkiisa, qowmiyaddiisa, iyo jinsigiisa.
Waxaa jiro duruus qoraal (Writer's Workshop) oo xooggan si ardaydu ugu	Dugsiyada dhexe waxay xoojiyaan manhajka luuqadda ingiriiska ee English Language Arts (ELA) kaasoo gaarsiyo duruusta qoraalka ee Writer's Workshop ilaa fasalka 6aad.

shaqeeyaan heerkooda waxbarashadooda.	
Xiriirka aasaasiga ah (Foundation) ee u dhexeeyo macallimiinta iyo ardayda fasalka.	Fasalka Foundation waa fasal la-talin ah oo lagu caawinayo ardayda inay ka gudbaan dugsiga hoose una gudbaan dugsiga dhexe iyadoo la dhisayo bulsho taageerta ardayda iyo macallinkooda. Deegaankan daryeelka leh wuxuu caawiyaa ardayda iyagoo diiradda saarayo guusha tacliineed, habdhaqanka wanaagsan ee onlaynka, waxbarasho xag shucuur iyo xag bulshaba, iyo mowduucyada kolleejada iyo shaqada xirfadeysan.
Wuxuu ka shaqeysiiyaa awoodaha xiiso ee ardayga iyo kuwa dabiiciga ah.	Ardaydu waxay qaataan fasallo dookhooda ah (electives) halkaasoo ay ka helaan xirfado, ku bartaan waxay xiiseeyaan, oo ayna farxad-geliso. Fasallada sida caadiga ah waxaa ka mid ah farshaxanka, waxbarashada jirdhiska, caafimaadka iyo luuqadaha adduunka.

Dugsiga Obama Middle School

Dugsiga Dhexe ee Obama wuxuu taageeri doonaa ardayda sida ugu wanaagsan wax u barata jebi ka shaqeysiyo ardayda quluubtooda, gacmahooda, iyo maskaxdooda.

Qiyamka Muhiimka inoo ah

- **Arday madaxbannaan:** Wuxuu qaabkan taageeraa ardayda khibradda u leh doorashada hawlaha quseeyo waxa ay jecel yihiin inay ogaadaan oo wuxuuna dhisaa xirfadaha ardayda ku cusub waxbarashada madaxbannaan. Wuxuu diiradda saaraa waxbarasho qoto dheer oo waasiciinayso maskaxda ardayda.
- **Xiriirka wanaagsan ee lala yeesho nafta, asxaabta, iyo barayaasha:** Wuxuu qaabkan abuuraa dareen ka mid ahaanshaha dugsiga iyo asxaabta iskoolka. Si dhab ah ayaa loo aqbalaa dhammaan ardayda, kala duwanaashahuna waa awoodda bulshada iskoolka.
- **Waxbarasho Iskaashi leh:** Ardaydu waxay ka wada shaqeeyaan si ay u koraan oo wax u bartaan.
- **Waxbarasho Qaab Tijaabo ah:** Ardaydu waxay adeegsadaan waxbarasho ku salaysan mashruuc si ay u dhisaan xirfado, u bartaan fikrado, oo ayna u dabaqaan ka shaqeysiinta maskaxda si ay wax uga bartaan nolosha dhabta ah.
- **Xiriir ku taxalluqa dunida dabiiciga ah:** Ardaydu waxay la falgalaan dunida dabiiciga ee fasalka banaankiisa ah si ay taas uga caawiso waxbarashadooda.
- **Adeegga bulshada:** Ardaydu waxay noqdaan hoggaamiyeyaal mas'uul ah iyo tababeryaal ardayda kale waxbaro kuwaasoo dib wax u tara bulshada iskoolka ee fasallada K-8.

Goobta Waxbarashada

- **Koox waxbarasho oo yar:** Iyagoo ka kooban ugu badnaan 150 arday fasalkiiba (grade), ardaydu waxay ku xiran yihiin bulsho yar oo ay wax wada bartaan.
- **Goobo waxbarasho oo dabacsan:** Goobo la cusboonaysiiyay ayaa loogu talagalay in lagu qaato waxbarasho iyo duruus kala duwan oo ballaaran.
- **Iskaashiga bulshada:** Bulshada waxaa lagu martiqaadaa inay noqdaan saaxiibbo si loo dhiso cilaaqaadka ardayga iyo taageerada waxbarasho ee ardayga. Ka-qaybgalka waalidka waa la soo dhaweeyaa oo lagu dhiirrigeliyaa ka mid noqoshada ururka waalidka ee PTO, fursadaha caawinta iskoolka, iyo ka qeybgalka munaasabadaha qoyska.
- **Kooxaha heerka fasalka (koox) - Grade-level cohorts:** Fasal walba waxa la dejiyaa dabaq u gaar ah si uu fasal walba u helo meel gooni u ah uuna u dhiso bulsho.

Talo-bixintaada

Maadaama aad ka fikireysid dugsiga dhexe:

Su'aalo	Jawaabaha
Maxaa kuugu qiimo badan waxbarashada ardaydaada?	
Waa maxay nooca waxbarasho ee uu qoyskaagu ka rajaynayo dugsiga dhexe?	
Maxaa muhiim kuu ah xilliga u gudbida dugsiga dhexe isla markaana uu ilmahaagu ka soo baxayo dugsiga hoose?	
Waynu ognahay in bulshada dugsigu ay muhiim tahay. Waa maxay rajadaada iyo riyooyinkaaga ku saabsan xiriirka ardaydaada ee ku aaddan bulshada waxbarasho ee dugsiga dhexe?	